



Munaafaqu wuxuu la mid yahay ri' ku wareersan laba ari dhexdood oo kolba mid aadaysa

Ibnu Cumar Allaha ka raali ahaado isagiyo Aabihiise waxaa laga wariyey in Nabiga naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate uu yiri: Munaafaqu wuxuu la mid yahay ri' ku wareersan laba ari dhexdood oo kolba mid aadaysa.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu cadeeyey munaafaqa xaalkiisa iyo inuu la mid yahay ri` ku dhex wareertay labo ari kii ay raaci lahayd. Ri`daas oo mar xayntaa arigaa u tagaysa marna xayntaa kale. Munaafaqiintu waxay ku dhex wareersan yihiin limaanka iyo kufriga, muuminiinta u lama jiraan si muuqata iyo si qarsoon, gaaladana u lama jiraan si muuqata iyo si qarsoon, balse waxay ka ag muuqdaan muuminiinta, waxaa urkooda ku jira shaki iyo walaac, qalbigoodu mar wuxuu raacin kuwaa, marna kuwaa kale.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65019>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

